Wax Yaabaha Aad Nagu Caawin Kartid

Marwalba waxaan u baahanahay dad nagu caawiya xaga caruurta oo lagu caawiyo shaqo guriga ay iskuula kala yimaadiin, cunto qeyybin, xaga gaadiidka, barnaamijyada dhalinyarada iyo waxyaalo kale oo badan. Waxayaabaha aan bulshada ku caawino waxaa kamid ah adeegyo wax barasho oo loogu talo galay ardayda dhigata dugsiyada sare, college ka iyo Jaamacadaha, sidoo kale waxaan fursad tababar siinaa ardayda soo baratay u adeega bulshada.

Waxaa kalood tabaruc dhaqaale ku caawin kartaa barnaamijyadeena wacyi gelinta bulshada iyo adeegyada latalinta. Hadaad $10 ama wax kabadan ugu deeqdid barnaamijyadeena, waxaa alguu soo diri doonaa warqad aad canshuurta ku dalbatid.

MSS Nabada iyo Cadaalada Dhalinyarada

MSS Dhalinyarada waxaa loo aas aasay in lagu caawiyo dhalinta da'da yar. Waxaan abaabulnaa barnaamijyo kala duwan oo loogu talo galay in dhalinyarada lagu soo jiito looguna soo dhex daro bulshadeena iyadoo hogaamiye looga dhigayo tababaro kala duwan, dhexgalka ardayda iskuulada, barnaamijyada caafimaadka maskaxda iyo jirka. Dhalin hogaamisa dhalinyaro kale waxay noqotay guulo dhisay awooda dhalinteenu in ay noqoto xubno firfircoon oo ka mid ah bulshadeena. Barnaamijyada qaar waxaa kamid ah: Ardayda oo lagu caawiyo shaqo guri ga iskuulada laga soo siiyo, da'yarta oo lahago, iyo kulug lahaanshaha ururada bulshada, sida war bixino kusaabsan dhaqanka iyo aqoon isweydarsiga iyo wada hadalo kusaabsan diinta.

Taariikhdeeni

Muslim Social Services waxaa la aas aasay Janaayo 2007 kadib markii la ogaaday baahida loo qabo hay'ad xasaasi ah oo diin iyo dhaqan ku saleeysan. Ilaa mudadaas MSS waxay ku hawlaneyd sideey u kobcin lahayd amar ku saleeysan diinta Islamka si xaq , sinnaan iyo nabad ah bulshadoo dhana u simantahay.

Ilaa iyo intii la aasaasay MSS iyo qaabka loo sameeyay ayaa ahaa mid ku dhisan iskaashi iyo wada shaqeeyn hay'ado kale, sida hay'adaha diimaha iyo xarumaha la- talinta in ay si fiican u habeeyaan shaqaalahooda u adeega bulshada. 2011 kii waxaa gacan weeyn ka qaatay in MSS ay horumar ku talaabsato heshiis iskaashi iyo wada shaqeeyn adag oo ay layimaadeen koox iskaa wax u qabso ah isla markaana heegana u ahaa sideey isbedel ugu sameeyn lahaayeen ururkan aan faaiido doonka ahayn ee samafalka ah.

Ujeedadeenu waa in aan ula dhaqano qof walba oo caawimaad kasoo doonta MSS in aan ugu adeegno si sharaf , ixtiraam iyo naxariis leh. Waxaana qiimeeynaa qofka noloshiisa, diintiisa iyo dhaqankiisa, waxaana dhamaan bulshada u diyaarinaa jawi degan inagoo sirtoodana u qqarineeyna.

Lasoo Xiriir

Agaasimaha Fulinta/Lataliye:
counsellor@muslimsocialservices.org

Muslim Social Services Kitchener-Waterloo

Adeegaya Bulshada

Muslim Social Services KW The Family Centre Hub
65 Hanson Ave
Kitchener, ON N2C 2H6
PH: 519-772-4399 Ext:3

info@muslimsocialserviceskw.org
www.muslimsocialserviceskw.org

Ontario Trillium Foundation
Fondation Trillium de l'Ontario

An agency of the Government of Ontario.
Relève du gouvernement de l'Ontario.

Ku Saabsan MSS

Ururka Muslimka ee U adeega Bulshada ee gobolka Kitchener Waterloo waa hay'ad samafal oo bixisa isla markaana u diyaarisa samafal dadka Muslimka ah iyo kuwa aan Muslimka ahaynba iyadoo hay'adu ay ilaalineyso dhaqanka iyo diimaha bulshada. Ujeedada MSS waa in la kobciyo jawi degan oo bulshadu usimantahay; waxayna bulshada loo diyaariyaa fursado waxbarashoo oo lagu taageerayo.

Ururku wuxuu isku deyaa siduu u abuuri lahaa una fahmi lahaa dadka muslimiinta ah ee ku dhaqan Canada, isla markaan aay dhisaan lana yeeshaan xiriir bulshooyinka diimaha kale haysta, kuwa u adeega bulshada iyo dhamaan ururada kale.

Aragtideena

MSS waxaad ku arkeeysaa bulsho loo wada dhan yahay isla markaana fahmeeysa baahida qof walba una diyaarisa caawimaad joogto ah.

Waxaan qiimeeynaa

* Mabd'a diin kusaleeysan
* Soo dhaweeyn
* Naxariis
* Ixtiraam
* Xog qarin
* Cadaalad

Barnaamijyada Qoysaska

Waxay faafiyaan wacyi gelin ku saabsan arimaha rabshadaha iyo xadgudubka wata ee qoyska iyo kuwa kale oo laxiriira hadii sharaf dhaca iyo ceeb ay kutimaado qoyska. Barnaamijkan ujeedadiisu waa in lagu cirib tiro dhibaateeynta qoyska iyadoo loo adeegsanayo barnaamijyo waxbarasho, dhaqan ahaan iyo diin ahaanba leh, iyo sidoo kale in la taageero haweenka iyo carruurta soo maraydhibaato, rabshado iyo xadgudub.

Waxaan sameeynay urur Muslimiin ah oo shaqaaalihiisu ka mid yihiin: Imaamyada, hogaamiyayaasha bulshada ,shaqaale xirfad u leh shaqada ay qabanayaan iyo shaqaale ka soo jeeda dhaqano kala duwan kuna hadla luqado kala duwan kuwaasooo dhamaantood iska kaashanaya sideey u cirib tiri lahaayeen rabshadaha iyoxad gudubyada qoysaska ka dhexeeya. Kooxdani waxay kayd u tahay hay'adaha kale ee ku lug leh wax ka qabashada rabshadaha qoyska.

Dejinta Dadka soo Barakacay: Qoysas badan oo soo barakacay ayaa yimid Kitchener Waterloo. Waxaan u diyaarinaa caawimaad ah in aan dejino dadka wadanka ku cusub, waxaan kacaawinaa waxyaabo badan oo ay kamid yihiin turjubaan, dhanka gaadiidka, barashada kombuyuutarka , gargaar cunto , iyo waxyaabo kale ee au u baahdaan jismi ama shucuur ahaan.

Barnaamijka Daryeelidda: Shaqaalaha iskaa wax u qabso ee MSS waxay booqdaan bulshada kaalmada u baahan iyagoo u diyaariya cunto waxayna booqdaan xiliyada jiro ama geeri timaado, waxayna u diyaariyaan dadka waayeelka ah kaalmo dhanka gaadiidka, cuntda iyagoo waliba u wehel yeela.

La-talin: MSS waxeey hadda udiyaarisaa dhammaan xubnaha bulshada ee gobolka Kitchener - Waterloo adeegyo la-talin iyo taageero joogto ah. Adeegyada la-talinta waxaa bixiya shaqaale diiwaan gashan oo u adeega bulshada isla markaana xirfad uleh shaqadooda kuwaas oo aad uga warqaba waxyaabaha xasaasiga ah sida dhaqanka iyo diinta dadka ay macaamiisha la leeyihiin. Adeegyada waxaa laga helayaa Xarunta Family Centre Hub Isniinta 10.00 am subaxnimo ilaa 2.00pm. Amaba waxaad sameeysan kartaa balan xiliyada caadiga ah ee shaqada lagu jiro. Intaa waxaa noo dheer in La- talinta Xarunta Qoyska ka sokow aan shirko lanahay Xaruunta la talinta ee Centre Delton Glebe, taasi oo ah xarun cusub oo Bulshada la talisa.

Xog isgaarsiinta Bulshada: MSS waxay cunto ku bixisaa barnaamijka lagu magacaabo Out of the Cold meals, iyagoo cuntadaasi sii marisiiya Trinity United Church. Waxaan sanadkiiba mar cunto kubixinaa St. John's Soup Kitchen waxaan kaloo cunto u diyaaarinaa shaqaalaha iskaa wax u qabso ee Habitat for Humanity iyo waliba kooxo kale. Inagoo kaashana House of Friendship Emergency Food Hamper, waxaan si joogto ah u diyaarinaa cunto xalaal ah. Qoysaska saboolka ahna waxaan siinaa xiliga Ramadaanka Kaar ay lacag ku jirto oo ay kusoo adeegtaan.

Waxbarashada Bulshada: Waxaan kaloo bixinaa seminaaro iyo aqoon isweydaarsiyo kusaabsan kala duwanaanta dugsiyada ,koleejyada, jaamacadaha , isbitaalada , booliska , hay'adaha adeegga bulshada ee maxaliga ah, iyo ururada kale ee bulshada. Waxaan sidoo kale si firfircoon uga qaybqaadanaa shaqooyin kusaabsan dhanka diimaha iyo isdhexgalka bulshada Kitchener-Waterloo.